

# SIDA LOO BAARO CARRADAADA


## WAA MAXAY SABABTA AAD U BAAREYSO CARRADAADA?


Caafimaadka carradu waxaa uu saamayn ku leeyahay caafimaadka dalagyada, beeraha yaryar, beeraha waaweyn, iyo deegaanka. Baaritaanada carradu waxaa ay cabbiri karaan qodobbada go'aamiya caafimaadka ciidda, sida pH, heerarka nafaqada, biraha culus, iyo aysiidhka. Baaridda carradu waxay ka caawisaa beeralayda yaryar iyo beeralayda waaweyn inay ogaadaan waxa dhulkoodu u baahan yahay si ay u abuurtaan dalag caafimaad qaba.


Baaridda carradu waxay sidoo kale badbaadin kartaa lacag sababtoo ah waxay muujin kartaa in beeraha yaryar iyo beeraha waaweyn aysan u baahnayn kombosti, bacriminta, iwm. Waxaa muhiim ah in beeralayda khudaarta ee ku nool magaalooyinka ay iska baaraan biraha culus si ay uga fogaadaan inay cunaan wax soo saarka ay ku jiraan biraha culus.

## SIDEE U SHAQAYSAA?

Baaridda bacriminta ciidda kujirta iyo waxay ka kooban tahay guud ahaan waxay u baahan tahay beeralayda inay u diraan ciiddooda shaybaadhka. Waa kuwan waxa laga filayo marka aad u soo dirto ciiddaada baaritaanka shaybaarka:

- 

1 Marka hore, waa inaad ka soo qaadaa muunada ciidda beertaada. Shaybaarada kala duwani waxay lahaan doonaan tilmaamo ururin kala duwan, laakiin intooda badani waxay kaa ururin doonaan muunado-hoosaadyada ciidda qaybaha kala duwan ee beertaada qoto dheer oo ah 6-8 inji ka dibna isku darka muunado-hoosaadyada.
- 

2 Marka ay carradu gaadho shaybaadhka, waxay isticmaali doonaan muunadda si ay u sameeyaan baaritaanada aad codsatay. Waxaan kugula talineynaa inaad ciiddaada ka tijaabiso nuxurka nafaqada, pH, iyo biraha culus.
- 

3 Inta badan saamballada waxaa laga shaqeynayaa dhowr toddobaad kadib marka la guddoomo. Marka muunada la baaro, shaybaadhka ayaa kuu soo diri doona natiijooyinka baaritaanka ciiddaada. Shaybaarada qaar ayaa sidoo kale bixiya talooyinka maaraynta ciidda oo ku salaysan natiijooyinka.



# HALKEE LAGU BAARAA CARRADA?

## **Shaybaarka Baaritaanka Nafaqada Ciidda iyo Dhirta ee UMass Amherst(Amherst, MA):**

UMass waxaa uu qabtaa falanqaynta ciidda caadiga ah, oo ay ku jiraan pH, aysidhka, nafaqooyinka la soo saari karo (P, K, Ca, Mg, Fe, Mn, Zn, Cu, B), rasaas, macdanta, awoodda beddelka ee iyoon + ah, iyo boqolkiiba inta alkali carrada kujirta. UMass waxaa kale oo uu sameeyaa baaritaan ikhtiyaari ah oo dheeraad ah oo ku saabsan maadada organik-ga ah ee kujirta ciidda, cusbada milmata, iyo nitrate carrada kujirta oo ku kacaya kharash dheeraad ah. *Email: soiltest@umass.edu*

## **Sheybaarka Falanqeynta Nafaqada Carrada Kujirta ee UConn (Storrs, CT):**

Sheybaarka Falanqeynta Nafaqada Carrada Kujirta ee UConn (SNAL) waa hab raqiis ah oo loogu tala galay beeraleyda yaryar inay ku baaraan caafimaadka iyo dihnaanta carradooda. UConn SNAL waxaa uu si joogto ah u baaraa ciidda si loo ogaado nafaqooyin kala duwan oo waaweyn iyo yaryar leh (Ca, Mg, P, K, S, Fe, Mn, Cu, Zn, Al, B), sunta rasaasta, awoodda beddelka ee aayon + ah, iyo pH-ka ciidda. Tani waxay bixisaa tala bixino ku saabsan limestone iyo bacrimiyaha ku salaysan natiijooyinka baaritaanka carrada. Kooxaha doonaya inay lacag kala soo haraan baaritaanka ciidda, UConn waxaa uu siin doonaa qiimo dhimis koox dhan ama ka kooban 10 muunado oo loo diro Falanqaynta Nafaqada Caadiga ah. *Email: soiltest@uconn.edu*

## **Adeegga Baaritaanka Ciidda ee Faraca Dheeraadka ah ee Iskaashatada UNH (Durham, NH):**

UNH waxaa uu leeyahay adeega baadhista ciidda kaas oo siiya falanqaynta ciidda iyo talooyinka bacriminta beeralayda yaryar iyo kuwa waaweyn. UNH waxaa uu sameeyaa falanqaynta ciidda caadiga ah iyo baadhitaanada ciidda ee la habeeyey marka la codsado oo kharash dheeraad ah lagu baxsho. Baaritaanka Caadiga ah ee Beera Falashada waxaa kujira Ca lasoo saari karo, Mg, K, P, pH-ka ciidda, maadada organik-ga ah ee kujirta, iyo falanqaynta baadhista rasaasta. *Email: soil.testing@unh.edu*

## MA U BAAHAN TAHAY CAWIMAAD IN LAGAA SIIYO AQRINTA BAARITAAN CARRO?

UConn iyo UNH labaduba waxay bixiyaan talooyin ku saabsan bacrimiyaha. Marka la eego wasakhaynta rasaasta, carrada leh 400 ppm rasaasta ama liidh gaarsiisan ama ka badan ayaa walaac ah meelaha carruurta ku ciyaarto oo meelaha leh 1200 ppm ayaa walaac ku ah dhammaan shakhsiyaadka. UConn SNAL sidoo kale waxay leeyihiin xaashi talo oo sharraxaad ka bixinaysa habdhaqannada maareynta liidhka oo laga heli karot: <https://soiltest.uconn.edu/factsheets/LeadGardenSoils.pdf>.

**Ilaha:** University of Connecticut Soil Nutrient Analysis Laboratory, University of Massachusetts Amherst Soil and Plant Nutrient Testing Laboratory, iyo University of New Hampshire Cooperative Extension Soil Testing Service